

**TALO SOO JEEDIN KU SAABSAN MARKA LA
BUUXINAYO WARQADDA DACWADA IYO WICIDDA**

Foomka Gobolka Minnesota UCF-8(SCAO 8/94)

MUHIIM: Warbixinta hoos ku qoran ma aha talo sharci. Haddii aadan fahmin warbixinta lagu siiyay, waxaa lagugula talinaya inaad la xiriirto qareen. Shaqaalaha maxkamadda dhexdhexaadinta waxay kaa caawin karaan oo kaliya wixii la xiriiria nidaamka maxkamadda. Shaqaalaha maxkamaddu ma aha qareeno mana ku siin karaan talo sharci. Adiga ayaa mas'uula ka ah inaad aad hubiso in waraaqahaagu waafaqsan yihii qodobada sharciga gobolka. Maktabadda Shargica Ee Degmada Hennepin oo ku taal dabaqa 24^{aad}, dhismaha maxkamadda ee Xarunta Dowladda, ayaa laga heli karaa buugaag qoraysa xeerka.

KU QOR MAGACAAGA OO BUUXA OO LA AKHRIN KARO. WIXII CADEYMO AH OO KIISKAAGA LA XIRIIRA SI BAYAAN AH U QOR. HADDII AA AL AKHRIN KARIN WAXAY KEENI KARTAA IN DACWADDADA AAN LA TEXGALIN ISLA MARKAANA AADAN HELIN FURSAD DAMBE OO AAD DAWCADAADA KU SOO GUDBISO! MAGACAAGA SI BAYAAN AH UGU QOR DACWADA OO DHAN.

DACWOYINKA OO DHAN WAA IN WARBIXINADAN SOO SOCDA LAGA HELAA:

Maxkamadda Degaanka afraad ee Hennepin	Dacwaddu waa in ay ahaataa mid laga diiwaan geliyey maxkamadda. (Taa macnaheedu waa in laga diiwaan geliyo degmada ku haboon tirada lacagtuna ayyan ka badnaynta la ogolyahay). Xeerka maxkamadda dhexdhexaadinta ee 491A ayaa laga yaabaa in uu ku caawino hadaadan hubin in kiiskaaga laga dhegaysan karo Hennepin County. Haddii dacwadaada laga diiwaan geliyay meel aan ku haboonayn, waxaa laga yaabaa in garsooruhi uusan dhegaysan. Laguu soo celin maayo lacagtii aad ku diiwaan gelisay dacwadaada.
Lambarka Dacwada	Ha buuxin. Maxkamadda ayaa ku siinaya lambarka dacwada ka dib markaad diiwaan geliso.
Codsade #1	Magacaaga oo buuxa u qor si la akhrin karo
Codsade #2	Magacaaga oo buuxa u qor si la akhrin karo ISLA DACWADDA, sida; Xaas/Say. Haddii ay jiraan 2 codsade ka badan, hoos eeg. Ma jirto dacwad kooxeedyo(class actions).
Jawaabe #1	Si buuxda oo la akhrin karo u qor magaca qofka aad dacwaynayso (sanduukhiiba hal magac sida; John iyo Mary Smith waa QALAD! John Smith waa Jawaabe 1; Mary Smith waa Jawaabe 2).
Jawaabe #2	Si buuxda oo la akhrin karo u qor magaca Jawaabaha 2aad. Haddii 2 jawaabe ka badan ay jiraan, hoos eeg.
Dadka is haya oo ah 3 ama ka badan	Haddii ay jiraan 3 codsade ama 3 jawaabe ka kabadan, ku qor magacyada oo buuxa ciinwaanada oo buuxa (oo ay la socdaan zip code-yadu) adiga oo ku qoraya H.C. Additional Litigant Form A (Foomka A ee Hennepin County ee Dadka is Haya ee Dheeraadka ah).
Ogow:	Bandhigyo aad ku cadaynayso kiis kaaga waa in aad keentaa dhegaysiga. Wax dukumiinti ah HAKU lifaaqin dacwaddaada, marka laga reebo warqadda aad ku wakiilanayso qareen

WARQADDA QORAALKA DACWADDA:

Qaybtani waa IN AY ka kooban tahay waxyaabaha soo socda:

1. TAARIKHDA WAX DHACEEN
2. SABABA AAD U DACWAYNAYSO
3. TIRADA LACAGTA AAD KU DACWAYNAYSO

Warbixintan oo aad ku muujin wayso qoraalka dacwadda waxay keeni karaa in dacwadda la baabi'yo. Lacagta aad ku diiwaan geliso dacwaddan lagumma soo celinayo haddaad raaci weyso tilmaamahan.

LACAGTA DIIWAAN GELINTA: \$55.00

Dacwaddaada waa in lagu hor saxiixaa nootaayo ama xoghayhaynta maxkamadda. Ku dar lambarka taleefoonkaaga ee maalinnimo.

Waxaad boga kale ee warqadda ka heli kartaa tusaale habka warqadda dacwada lagu qoro ah.

**SIDII LOO BUUXIN LAHAA WARQADDA
DACPADDADDA IYO WICIDDA**

MUHIIM: Warbixinta hoos ku qoran ma aha talo sharci. Haddii aadan fahmin warbixinta lagu siiyay, waxaa lagugula talinayaan inaad la xiriirto qareen. Magacaaga oo buuxa u qor si la akhrin karo.

FOOMKA DACWADA WAXAA LA ISTICMAALI KARAA MARKA AAD BUUXINAYSO KIIS KASTA OO AH MAXKAMADDA DHEXDHEXAADINTA. Wuxaa aad qorayso waa inaad ku dartaa taariikhda wax dhaceen, sababta aad dacwadda u qoranayso iyo intay ay le'eg tahay lacagta aad u dacwoonayso. Dacwooyinka qaarokood waxay u baahan yihiin xaqiyooyin gaar ah. Hoos waxaa ku taxan dhawr tusaale ee ah qoraalka dacwadda.

NOOCA DACPADDADDA	TUSAALEYAAL QORAALKA DACWADDA
Alaabta la iibshay & adeegyo la qabtay	“(alaab la iibshay) ama (adeegyo la qabtay) maalinta ama qiyaastii <u>(ku qor maalinta iibka ama adeegga)</u> , <u>(tilmaamaha alaabta la gaday ama adeegyada la qabtay)</u> oo aan qaybna laga bixin.”
Jeeg aan qimo lahayn	“Jeeg # _____ tirada lacagtu tahay \$_____ oo iyadoo aan la bixin bangigu soo celiyay <u>(waxaa weeye; lacag ku filan oo aan ku jirin, xisaabta oo la xiray, bixinta oo la jooqiyay, iwm.)</u> . Lacagta dheeraadka ah waa sida soo socota \$_____ <u>(sida, lacagta adeegga bangiga, ururinta kharajka, ganaaxa madaniga ah ee hoos yimaada MS 604.113, iwm.)</u> . Ogaysiiska bixin la'aanta, ganaaxyada iyo in ay suurta gal tahay in maxkamad ku taal Hennepin County ay talaabo qaado <u>(Taariikh)</u> ”
Khasaare baabuur	“Taariikhda shilka: _____ Wakhtiga shilka: _____ (AM ama PM [Subaxnimo ama Galabnimo]). Goobta shilka isgoyska u dhow _____ iyo _____, Magaalada _____. Baabuurka codsadaha waxaa waday : _____. Baabuurka jawaabaha waxaa waday : _____. Khasaaraha gaaray intuu yahay: \$_____. Kharajyada kale oo oo dheeraad ku ah kuwa kor ku qoran: \$_____. Wadarta lacagta la qabo oo ayyan ku jirin kharajka diiwaan gelintu: \$_____.”
Ijaar lagu leeyahay	“Ijaar ah \$_____ lagu leeyahay ahna bilaha _____, 20_____, ahna daarta ku taal _____, ku dar dulsaar iyo lacag la daahidda oo ah \$_____ iyo kharajya kale oo lagu daray (khasaare, kharajka biyaha, korontada, iwm. oo aan la bixin) dhan \$_____ ahna _____, oo aan qaybna laga bixin. Jawaabe daarta wuxuu cidleeyay/ka guuray markay ahayd ama agaheeda _____.”
Dabaajiga Khasaaraha (Damage deposit)	“In la soo celiyo dabaajiga damaanadda/ khasaaraha oo dhan \$_____ oo loo dhiibay jawaabaha markay ahayd ama agaheeda _____ looguna dhiibay daarta ku taal _____, ku dar dulsaar dhan \$_____; ganaax hoos yimaada MS 504B.178, qaybiisa 4 lacagtuna dhantahay \$_____; iyo ganaaxa khasaaraha oo hoos yimaada MS 504B.178, qaybiisa 7 lacagtuna dhantahay \$_____, wadarteeduna tahay midda kore. Jawaabe daarta wuxuu cidleeyay markay ahayd ama agaheeda _____. Ogaysiiska khasaaraha (waa la siiyay) (lama siin)”
Mushahar aan la bixin	“Codsaduhu wuxuu u shaqaynaayay Jawaabaha laga bilaabo _____ 20____ illaa _____ 20_____, isagoo qaadanaaya mushahar ah \$_____ (saacaddii, todobaadkii, bishii) _____. Markay ahayd ama agaheeda _____, Codsade (waa is casilay)(laga saaray). Codsade wuxuu eedaysane ku leeyahay mushahar uu shaqaystay inta u dhexaysay _____ 20____ iyo _____ 20____ dhanna \$_____, iyo lacaga laga shaqaystay _____ dhanna \$_____. Codsade wuxuu xaq u leeyahay ganaax aan ka badnayn 15 maalmood shaqadoodii oo dhan \$_____ sababtuna ay tahay Jawaabaha oo ku bixin waayay mushaharkii wakhtigii laga rabay, iyadoo la raacayo MS 181.13.”
Replevin (Hanti Celin)	“Codsade waa mulkiilaha xaqa u leh in uu si dhakhso ah u hanto badeecado ama hantida hoos ku tilmaaman ama qiime u qalma oo dhan \$_____, ku dar lacagta diiwaan gelinta : <u>(sifada hantida iyo shay walba qiihiisa lacageed)</u> . In markay ahayd ama agaheedi _____, 20_____, Jawaabuhu si qalad ah uu uga qaataay codsadaha. Jawaabe wali si qalad ah ayuu u haystaa alaaboooyinkaas.”

**SIDA LOO BUUXIYO WARQADDA DACWADDA WAXAA LAGA HELI
KARAA BOGA KALE EE WARQADDAN**